

Jamhuuriyadda Somaliland

GOLAHA WAKIILLADA

Xarunta, Hargeysa



Republic Of Somaliland

HOUSE OF REPRESENTATIVES

HQ, Hargeisa

Our Ref ; .GW/KF-5-67/98.Date : .1/8/98ka.GO'AAN DIB U ANSIXIN KEERGolaha Wakiilada JslMARKUU AHKAY

- Qodobka IOC (4) ee Dastuurka Qaranka Jsl,

MARKUU AHKAY

- Warqada No. JSL/GW/003-010/598 ee 3 Mey 1998ka, ee Madaxweynuhu dib ugu soo celiyey Golahan Xeer-maamuuska xilgudashada Golayaasha Baarlamaanka (Xeer.Lr. 03) ee Goluhu hore u ansixiyeen.-

MARKUU DARSAY

- Asbaabaha Mudane Madaxweynuhu u cuskaday dib u soo celinta xeerkan.-

MARKUU U CODEEWEY

- Dib u ansixinta Xeerkan, fadhigiisii maanta 1/8/98ka, oo ay goob joog ahaayeen 63 Mudane.-

Wuxuu cod aqlabiyad ah (60-cod) oo gacanantaag ah, mar labaad ku ansixiyey XEER-MAAMUUSKA XILGUDASHADA GOLAYAASHA BAARLAMAANKA, ee Madaxweynuhu soo celiyey. Ansixinta xeerkaas waxa codkiisa ku diiday (I) hal mudane, (I) hal mudane oo kalena wuu ka aamusay. Guddoomiyuhuna ma coddayn sida caadada ah.-

ALLAA MAHAD LEH

(Axmed Maxamed Aadan)

-GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILADDA-

(Maxamed Kaseen Cismaan)

-XOQHAYAHA GUUD EE GOLAHA WAKIILADA-

Jamhuuriyadda Somaliland

GOLAHA WAKIILLADA

Xarunta, Hargeysa



Republic Of Somaliland

HOUSE OF REPRESENTATIVES

HQ, Hargeisa

Our Ref ; .GW. /11/29598.

Date : 11/8/98ka.

Ku:- Mudane, Maxamed Ibraahim Cigaal,
Madaxweynaha Jsl,
Hargeysa.-

UJ/- SOC GUDIN GO'AAN GOLE.

Mudane Madaxweyne

Waxaan halkan kuugu soo gudbinayaa go'aan GW/KF-5/ /98 ee 1/8/98 oo Golaha Wakiiladdu mar labaad ku ansixiyey Xeer-maamuuska xilgudashada Golayaasha Baarlamaanka (XEER LR. 03) ee aad hore u soo celisay, iyadoo aan wax isbedel ah lagu samayn.-

ALLAA MAHAD LEH



(Axmed Maxamed Aadan)
-GUDDOONIYAHU GOLAHA WAKIILLADA-

JAMHUURIYADDA SOOMAALILAND
GOLAHA WAKIILADA



XEER LR. 03

XEER-MAAMUUSKA XILGUDASHADA
GOLAYAASHA BAARLAMAANKA

8.3.98

GOLAHA WAKIILADA

MARKUU ARKAY

Qodobada 72, & 102 ee Dastuurka oo ku saabsan dhawrsanaanta mudanayaasha Baarlamaanka.

MARKUU ARKAY

Qodobada 78 (6/7) iyo 90 (5) ee Dastuurka oo ku saabsan u yeedhista & xogwarraysiga masuuliinta Dawladda.

MARKUU ARKAY

Qodobada 60 (4/5) iyo 62 ee Dastuurka oo ku saabsan xilgudashada Baarlamaanka iyo kan Golaha Wakiilada u gaarka ah.

MARKUU ARKAY

QODOBKA 72 (2) ee Dastuurka iyo qodobka 29 ee Xeer-hoosaadka Golaha oo tilmaamaya sifaha keenida mashruuc sharci.

MARKUU TIYGELIYAY

Qoo jeedintii 11 mudane ay ku soo bandhigeen mashruuc sharcigan.

MARKUU IS TUSAY

Baahida loo qabo habsami u socodka hawlaha Qaranka. -

WUXUU SOO SAARAY XEERKAN

QODOBKA 1'AAD

Xubnaha Golayaasha Qaranka (Baarlamaanka) looma diidi karo gelida xafiisyada Dawladda iyo meel kasta oo ay shaqo qaran ka socoto, marka ay gudanayaan xilkooda iyo waajibaadkooda Dastuuriga ah.

QODOBKA 2'AAD

Waa waajib in hay'adaha iyo Wasaaradaha qaranku siiyaan xog-rasmi ah oo run ah gudi-hoosaadyada Golayaasha iyo mudanayaasha loo igmado xil-gudasho.

QODOBKA 3'AAD

Qid kasta oo ka hortimaada xeerkan ama meel kaga dhacda sharafta mudane ama xayirta xilka uu gudanayo waxaa lagu ciqaabayaa xeerka ciqaabta gudi ee ah dambiyada laga galo hawl-wadeen qaran.



- 2 -

QODOBKA 4'AAD

Haddii xayiraada ama ka hortaga ama sharaf-ridka yahay hanjabaad ama weerar gacan loo la tago mudanaha waxaa la laban laabayaa ciqaabta inta xeerku ogol yahay!-

QODOBKA 5'AAD

Waxaa waajib ku ah dhammaan shaqaalaha Dawladda, Ciidamada qaranka iyo cidii kale ee hawl qaran looga baahdo u hoggaansamaan Xeerkan.-

QODOBKA 6'AAD

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa 30 maalmood ka bacdi marka Madaxweynuhu saxeexo.-



Ismaciil
(Cabdi/dir Ismaciil X. Jirde)
K/S. GUDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILADA

Maxamed Xuseen Ciis
(Maxamed Xuseen Ciis)
XOGHAYAHA GUUD EE GOLAHA WAKIILADA

-Shalilaa-